



Waalidka qaaliga ah

Ilmahaagu mar dhow ayuu bilaabayaa iskuulka, iskuulada dawlada ee kamununaha koobanheegan waxay idinku soo dhawaynayaan gacmo furan.

Dooro iskuul

Ilmahaagu wax uu raacsan yahay iskuulka (degmada), halkaas oo ah meesha uu ilmahu degaanka ku yahay. Marwalbaana ilmaha waxaa uu ku leeyahay boos iskuulka degmada. Haddii uu shaki kaaga jira iskuulka degmada ee ilmahaaga ka tirsan yahay, waxaad ka heli kartaa halakan: www.kk.dk/skoleindskrivning, waxaad ku qoraysaa cinwaanka ilmahaaga, kadibna waxaad arkaysaa iskuulka degmada uu ka tirsan yahay.

Deenmaark qofka waxa uu dooran karaa iskuulka uu doono. Siddaa daraadeed, waxaad ilmahaaga ka soo qori kartaa iskuul kale, oo ka baxsan degmadiina. Laakiin waxaa la siinayaa oo kaliya, haddii uu iskuulka ka banaan yahay boos. Waxaad ka akhrin kartaa su'aalaha inta badan la iswaydiiyo, ee la xidhiidha iska diiwaan gelinta iskuulada halka: www.kk.dk/skoleindskrivning.

Dooro kuluubka waqtiga firaaqada

Kamuunaha koobanheegan iskuul walbaa wuxuu leeyahay kuluub loogu talagalay waqtiga firaaqada caruurta. Ilmahaagu marwalbaa waxaa uu ka helayaa boos kuluubka loogu talagalay waqtiga firaaqada caruurta, ee raacsan iskullka ilmahaagu bilaabay. Haddaad u doonayso ilmahaaga boos, waa inaad isagan u diiwaan gelisaa marka aad ilmaha u diiwaan gelinayso iskuulka.

Goorma iyo siddee baad ilmahaaga ugu diiwaan gelinaysaa iskuulk iyo kuluubka waqtiga firaaqada?

Is diiwaan gelintu waxaa laga samaystaa baraha interneetka ee www.kk.dk/skoleindskrivning. Halkan ayaad ku diiwaan gelinaysaa iskuulka aad u rabto ilmaha, isla markaana waxaad ku diiwaan gelinaysaa inaad ilmaha u rabto kuluubka waqtiga firaaqada.

Waxaad ilmahaaga diiwaan gelin kartaa laga bilaabo:

Isniinta 4. nofeembar 2024 ilaa axada 24. nofeembar 2024

Si ay suurtagal kuugu noqoto inaad ilmahaaga ka diiwaan geliso iskuul iyo kuluubyada ciyaarta, waa inaad isku ciwaan degan tihiin.

Haddaad u baahan tahay in lagaa caawiyo, diiwaan gelinta ilmahaaga, waxaad la xidhiidhi kartaa iskuulka degmada.

Hadduusan ilmahaaga bilaabayn iskuulada dawlada ee kamuunaha koobenheegan?

Haduusan ilmahaaga bilaabayn iskuulada dawlada ee kamuunaha kobenheegan, waa inaa sheegtaa sababaha uusan u bilaabayn, adigoo ku qoraya halkan: <https://indskrivning.dk/indskrivning/login.aspx?s1=996996>.

Goorma ayaad helaysaan fariin?

Waxaad helaysaa fariinta kuu sheegaysa iskuulka ilmahaaga bilaabay, bilowga bisha febaraayo. Waxaad helaysaa warqad, laguugu soo dirayo boostada borger.dk ama e-Boks, kaagana imaanaysa iskuulka uu ilmahaaga ka helay booska.

Salaan diiran